

Guudmarka ECEAP

Early Childhood Education and Assistance Program (Barnaamijka Waxbarashada iyo Caawinta Carruurnimada), ama ECEAP (oo loogu dhawaaqo "E-Cap"), waa barnaamijka xanaanada carruurta ee ay maalgeliso gobolka Washington ee loogu talagalay carruurta 3 iyo 4 jirka ah.

ECEAP waa u bilaash dhammaan qoysaska u qalma.



Maxaa ku jira ECEAP?

ECEAP waxaa ka mid ah waxbarashada kahor xanaanada carruurta, taageerada qoyska barta (www.dcyf.wa.gov/publications-library/EL_0079) iyo ka-qaybgalka, caafimaadka jirka, caafimaadka maskaxda iyo nafaqada.

Fasallada ECEAP waxaa la bartaa laba saacadood iyo bar ilaa 10 saacadood maalintii, afar ama shan maalmood usbuucii.

Waa maxay faa'iidooyinka ECEAP?

Carruurta waxay bartaan sida loola dhaqmo dadka kale. Waxay bartaan aasaaska xisaabta, akhriska, iyo sayniska. Waalidiinta waxaa taageera ECEAP marka ay ka shaqeynayaan sidii loo gaari lahaa yoolalka qoyska.

Si aad wax badan uga barato, ka akhri Adeegyada Dhammaystiran ee ECEAP bogga internetka barta www.dcyf.wa.gov/publications-library/EL_0081

Sideen u codsan karaa?

La xidhiidh bixiyahaaga adigoo booqanaya ECEAP ee Bulshooyinka Washington barta <https://dcyf.wa.gov/practice/oiaa/reports/early-learning-dashboards/eceap-early-eceap-wa-communities> ka dibna guji tab-ka Macluumaadka Xiriirka Goobta.

Marka la ogaado xaq u yeelashada, diiwaangelinta carruurta waxay ku jiri doontaa booska loo baahan yahay.

Ilmahaygu ma u qalma?

- Carruurta waa inay jiraan 3 ama 4 sano; oo
- buuxiya shuruudaha soo socda* oo ay ku jiri karaan laakiin aan ku xaddidnayn:
 - Qoyska dakhligiisu gaadhayo ilaa 36% dakhliga dhexe ee gobolka (SMI) www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/eceap/State-Median-Income-Chart.pdf; ama
 - Qoys u dhashay dalka oo hela ilaa 100% SMI; ama
 - U qalanta adeegyada waxbarashada gaarka ah; ama
 - La kulma hoy la'aan; ama
 - Waxay qayb ka ahayd Early Support for Infants and Toddlers (Taageerada Hore ee Dhallaanka iyo Carruurta dhallanka ah), Adeegyada Ka Hortagga Daryeelka Carruurnimada, Bilawga Hore, ama ECEAP Hore; ama
 - Leh Qorshe Waxbarasho Shakhsiyeed (IEP); ama
 - Waxay leedahay shuruudo kale, oo ay ku jiraan: Ku lug leh adeegyada daryeelka gobolka ama kuwa dadka asaliga ah ama xaaladaha caafimaadka jirka ama maskaxda ee muddada dheer.

**Fadlan wac bixiyahaaga si aad u ogaato u-qalmitaankaaga gaarka ah.*

Haddii aad rabto nuqullo bilaash ah oo daabacaadan oo ku qoran qaab ama luqad kale, fadlan kala xiriir DCYF Xiriirka shacabka lambarka 1-800-723-4831 ama iimayl u dir communications@dcyf.wa.gov.

DCYF PUBLICATION EL_0099 SM (11-2025) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES